# KANI MA LA WADAAGI KARAA?

**Ku saabsan qaadashada, haysashada iyo la wadaagga sawiro qaawan**

Polisen



# Waa la wadaagi *karaa*. Laakiinse ma yahay mid la wadaagi karo?

**Booliiska ayaa soo saaray agab waxbarasho ”La qaybsan karaa?” taas oo ay ujeedadu tahay in la kordhiyo aqoonta ku saabsan iyo ka hortag dambiyada galmada ee ka dhanka ah carruurta ee internet-ka online.**

Galkaani waa qeyb ka mid ah agabka waxbarasho waxaana loogu talagalay adiga mas'uul ahaan ama qof kale oo weyn oo ka ag dhow carruurta. Carruurta iyo dhallinyaradu waxay adeegsadaan ciyaaro badan oo baraha bulshada ah, taas u sahleeysa kuna dhiirigelisaa inay wadaagaan sawirada iyo muuqaalada filimada ah. Mararka qaarkood tani waxay ka dhigan tahay inay qaataan, haystaan oo wadaagaan sawirro qaawan iyo filimada ayaga iyo kuwa kaleba ah.

*Halkan waxaad ka heli doontaa wax badan oo ku saabsan waxa sharcigu sheegayo iyo waxa booliiska uu ku caawin kara. Waxaad sidoo kale helaysaa tallo bixin ku saabsan sida aad ilmahaaga ugala hadli laheyd sida xilkasnimada leh ee loo dhaqmo xagga online-ka.*



# Sharciga Iswiid-hishka ayaa si-doo kale khuse-eya Online-ka

Dabcan, sharciyada iyo xeerarka ayaa sidoo kale khuseeyaan inter-net-ka. Qaar badan ayaa dareensan qarsoodiga online-ka, kaas oo gacan ka geeysta waxa qofku heli karo iyo waxa aanu sameeyn karin taa oo lafteeda laga yaabo inay tahay waxaan waadix aheyn.

Booliisku waxay arkaan tusaalayaal badan oo dhalinyaro ah oo sawirro qaawan u soo dira qof ay ku kalsoon yihiin, laakiin markaasi la sii faa-fayo. Dhalinyaro dhowr ah ayaa sawiro u dir saaxiib interner-ka ah, kaa oo laga yaabo inuusan noqon siddii ay moodayeen oo markaasi ugu hanjaba in uu faafiyo sawirada.

In sawiro qaawan iyo muuqaallo lagu faafiyo internet-ka waxay noqon kartaa dambi, in sidoo kale la helo ama ay jiraan sawiro nocaas ah waxay noqon kartaa wax la karaahiyeeysto. Tani waa mid ka dhigeeysa wax adag in arrimahan oo kale qof weyn lagala hadlo sida ay wax u dhaceen. Dad badan baa ogeyn waxa dembiilaha ah marka ay timaado dhacdada noocaan oo kale ah. Uma baahnid inaad ogaatid in taasi dembi tahay iyo inkale Booliiska ayaa taas go'aamin kara marka loo sheego.

* Sawirada qaawan, waxaan tixraacnaa sawirada galmada ama filimada carruurta ka yar 18 sano jir.Macnuhu maaha in ilmuhu qaawan yahay, waxa kale oo ay noqon kartaa wax ku saabsan dhar yar amasawiro leh dabeecad galmo siyaabo kala duwan.



# Tusaaleyaal kale oo xaqiiq ah

Rimna iyo Max waa 15 sano jir waxaana jacayl u qabaa midba midka kale. Rimna ayaa saaxiibkeed weyddiiyey haddii ay soo dirtay Max sawiro qaawan weli. Saaxiibka Rimna ayaa u fakeraya haddii iyada sidaasi sameeyn laga yaabo inuu ku daalo. Rimna wax niyad uma heeyso inay dirto sawirro qaawan laakiin waxay ka walwalsan in Max lumiyo wax xiiso ah.

Alex iyo Calle waxay bilaabayaan inay sheekeystaan. Way is jecel yihiin iyo alex wuxuu soo dirayaa xoogaa sawirro qaawan. Habeen habeenada ka mid ah ayay col noqdeen. Calle ayaa qoray in haddii Alex uusan soo dirin sawirro badan, uu u diri doono kuwa uu haysto saaxiibbadiis. Alex intuu xanaaqay ayuu sheekadii xidhay. Maalinta xigta wuxuu ogaaday in sawirada lagu faafiyay agagaarka dugsiga.

Melvin wuxuu joogaa xaflad fasalka wuxuuna la cabbay asxaabtiisa. Wuxu dareemaya xanuun wuxuuna isku xiray suuliga. Markaa ka dib ma xasuusto, laakiin waxa uu helay caawimo si uu tago guriga. Maalinta xigtay waxaa moobiilkiisa ka buuxa fariimo. Qof ayaa kula wadaagay qolka sheekeysiga fasalka leeyahay sawirada Melvin. Sawirada waxaa ka muuqda isaga oo qaawan oo ku matagaya sagxada musqusha.

Sanna waa 11 jir waxayna jeceshahay inay samaysato qoob ka ciyaar iyada u gaar ah oo ay geliso online ka. Maalin ayaa qof aanay aqoon u soo diray dick pic. Waxay  u aragtaa inay tahay wax laga yaqyaqsoodo, balse  way ku dhici kari weysay inay u sheegto waalidkeed sababtoo ah way ka baqeysa inay u ogolaan waayaan inay isticmaasho app-kaasi.

Mira waxay online kula kulantay spralliga-Sofia waxayna noqdeen saaxiibo fiican. Spralliga-Sofia waxay uga sheekeeyneysa asxaabta, dugsiga iyo siraha taasoo aanay cid kale u sheegin. Mardhow spralliga-Sofia ayaa dooneysa inay la kulanto Mira. Arrinta aysan Sofia sheegin ayaa ah in magaceeda la yiraahdo Johan oo 35 jir ah, lana sheekeysanaya Mira si ay mira ugu dhiirato inay la kulanto.

# Sharciga ma garanayaan

Dhalinyaro badan ayaan garanayn sharciga mana garanayaan halka xadka ku yaal waxaad internetka ku samayn karto. Waxaa laga yaabaa inay kaliya fahmaan cawaaqibka markaa ka dib, ka dibna waase mid soo daahday.  Sawirada qaawan iyo filimada waa adag yihiin si meesha looga saaro haddii mar lagu faafiyay internet-ka. Inaga oo og in qofku sawirkii-sa qaawan yahay online la wadaago waxay ka dhigan tahay walbahaar weyn iyo mararka qaarkood rafaad waqti dheer ah, gaar ahaan carruurta iyo dhallinyarada. Dadka badankiis waxay fahansan yihiin in wax la sii faafiya aysan aheyn wax wanaagsan, laakiin intee qof ayaa og inay dhab ahaantii tahay wax dembi ah?

### Muxuu sharicu leeyahay?

Waa dambi in sawiro iyo muuqaalo qaawan loo diro qof kasta oo ka yar 15 ama qof ka weyn 15 sano oo aan bixin ogolaanshahooda. Waa wax dembi ah in lagu cadaadiyo ilmaha ka yar 18 jir inay soo diraan sawiro qaawan. Waa wax dembi in la wadaago sawirada qaawan ee carruurta iyo dhalinyarada ilaa 18 sano jirka ah. Waxa ka reebban haddii qof ay isku da' yihiin uu haysto ama helo sawir qaawan oo ah qof ka weyn 15 jir oo u haysta inay ok. Laakin had iyo jeer waa dambi in loo faafiyo ogolaansho la'aan.

### Waa maxay dembiyada ay ku saabsan tahay?

Qof ayaa kuu soo diray sawir qaawan oo aanad rabin:

**Waa Dhibaatayn galmo**

Qof ayaa la wadaaga sawir qaawan oo ilmo ah oo ku jira koox wada sheekaysi: **Dembiyada qaawan ee carruurta**

Lamaanahaaga ama qof kale ayaa kugu cadaadiya inaad soo dirto sawiro qaawan:

**Isku dayga ka faa'iidaysiga carruurta ee galmada**

Qof ayaa la wadaaga sawirka qof ku sugan xaalad nugul ogolaansho la'aan, tusaale ahaan musqusha:

**Duulaanka sharci darada ah ee gaarka ah**

Qof ayaa ku hanjabay inuu daabici doono sawirro qaawan haddii aadan wax badan soo dirin:

**Ka faa'iidaysiga carruurta ee sawirrada galmada,alt. ka faa'iidaysiga culus ee carruurta loogu geysto sawirrada galmada**

# Maxaad samayn kartaa markaad qof weyn tahay?

Waa muhiim in carruurta iyo dhallinyaradu ogaadaan inay la hadli karaan waalidkood, ama dadka kale ee waaweyn ee ay ku kalsoon yihiin waxa ka dhacaya onlaynka. La hadal carruurtaada, weydii su'aalo oo u sheeg cawaaqibka wadaagga sawirrada. Sidan, waxaad ku caawinaysaa ilmahaaga inuu fikiro oo uu sameeyo doorashooyin wanaagsan. Halkii la xukumi lahaa ama lagu ciqaabi lahaa haddii ay wax qaldamaan, waxa fiican in la sharaxo inay caadi tahay inaad khalad samayso.

Dareen xor u ah daawashada filimka "Delbart" ee polisen.se/delbart oo ka wada hadla dhacdooyinka filimka. Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu lahaa khibrad u gaar ah ee qaadashada, kaydinta ama wadaaga sawirada, ama in saaxiib ama qof dugsiga jooga uu la kulmay tan. Waxaad sidoo kale su'aalo iyo jawaabo ka heli doontaa polisen.se/delbart.

**polisen.se/delbart**

## Talooyin loogu talagalay kuwa la hadla carruurta iyo dhalinyarada

Fiiro u gaar ah u yeello arrimaha ilmahaaga ee baraha bulshada, ciyaaraha iyo saaxiibada online-ka ah. U ogolwo in ilmuhu muujiyo oo si joogto ah u waydii sida uu yahay internet-ku ma aha oo kaliya sida uu yahay dugsiga ama tababarka.

- Ka hadal cawaaqibka ka dhalan kara dirida sawiro qaawan. Xitaa markaad qof aaminto. Marna lama ogaan karo waxa marka dambe dhici doona iyo sida ay sawirada ku dambeeyaan.
- U sheeg inay dembi noqon karto in sawiro qof 18 sanno ka yar sawiro lagu cadaadiyo cadaadiyo qof ka yar 18 jir. Way fududayn kartaa in la yidhaahdo MAYA.
- U caddee in aanay weligeed eed lahayn dhibbanaha haddii ay wax dhacaan, mas'uuliyadda mar walba waxay saaran tahay qofka dambiga gala.
- Carruurtu waxay noqon karaan dhibanayaal dembi, laakiin sidoo kale waxay noqon karaan dembiilayaasha dambiyada, tusaale adigoo la wadaagaya dadka kale sawiradooda qaawan.
- U sheeg inay jiraan dad waaweyn oo online ah oo isku daya inay ka faa'iidaystaan carruurta, tusaale ahaan in loo diro sawiro qaawan. Waxay ku fiican yihiin in wax la khiyaaneeyo oo badanaa way leeyihiin xeelado ay ku soo jiitaan dareenka iyo kalsoonida carruurta. Waa wax aan caadi aheyn in dhowr carruur ah ay isku qof dhibane noqdaan.
- Haddii ilmuhu ka sheekeeyo dhacdo, waa muhiim in aan la ciqaabin iyadoo la mamnuucayo ciyaaraha, baraha bulshada iwm sababtoo ah. Inta badan nolosha bulsheed ee ubadku waa online.
- Haddii ilmuhu akoon ku leeyahay baraha bulshada ama apps-ka, hubi taas ilmuhu inuu sheego da'diisa dhabta ah. Barnaamijyo badan ayaa abuuray caqabado helitaanka ku salaysan da'da isticmaalaha.

# KANI MA LA WADAAGI KARAA?

**Ilmahaaga khatar mak u jirtaa?**

**Waa kuwan qaar ka mid ah talooyinka:**

- Qaado shaashadaha oo dukumeenti gare wixii dhacay, si tusaale, meesha iyo goorta la wadaagay sawirka ama muuqaalka.  Waxba tirtirin mar walbana u sheeg booliiska! Xitaa haddii aad leedahay magac magac kale.

- Ha wadaagin sawiro ama muuqaalo kale, ha dirin farriimo kale. Waxba ha bixin.

- Oo la xirriir booliiska 114 14 ama arag ciwaanada iyo saacadaha shaqada. Ee booliska haddii aad rabto inaad booqato booliiska. Waxaad wax badan ka akhrin karta iyo warbixinta booliiska ee bartooda internet-ka polisen.se/delbart.

- Had iyo jeer wac 112 haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.

- Haddii ilmuhu u baahan yahay inuu qof kale la hadlo, waxaad kartaa tusaale ahaan la xiriir adeegga bulshada, ururka xuquuqda carruurta ee ECPATs khadka taageerada ee 020 112 100 ama dittecpat.se, Brottsofferjouren 116 006, ungaboj.se ama Bris 116 111, bris.se. Waxay bixiyaanta-ageero telefoonka iyo la sheekeysiga carruurta iyo dhalinyarada.

**Wax badan ka sii akhri polisen.se/delbart**

Aad iyo aad ayaa loogu mahadcelinayaa booliiska Norway oo la wadaagay khibradooda, suurtageliyayna tarjumaada iyo soo saarista qoraalka ”Delbart” ee Swedishka.